

Ogeysiiska kordhinta dugsi ka joojinta

Isticmaalida adeega turjumaanka taleefanka si aad dugsiiga ula xiriirto

Magaca ardayga

Name of student

Gacaliye xannaaneeye/waalid

Warqada ku lifaaqan ayaa sharxaysa faahfaahinta kordhinta Ogeysiiska dugsi ka joojinta ee aan siiyey ilmahaaga sida waafaqsan nidaamyada Cayrinta iyo Dugsi ka Joojinta iyo Qorshaha Dabeecada Ardayda ee Wasaaradda Waxbarashada NSW.

Warqadu waxay ku siinaysaa taariikhda cusub ee dhammaadka dugsi ka joojinta waxayna kugu martiqaadaysaa inaad ka soo qaybgasho kulanka natiijada ee lagaga wada hadlayo dugsi ka joojinta iyo qoyshaynta taageerada marka ilmahaagu uu ku noqdo dugsiiga. Marka dugsiigu kula soo xiriiro, fadlan na soo ogeysii haddii aad u baahan tahay turjubaan inuu joogo kulanka waana kuu balaminaynaa. Haddii aad dhib kala kulanto Fahamka warqada ku lifaaqan fadlan la xiriir dugsiiga si aan u sharaxno.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjubaan markaad la xiriiraysid dugsiiga, fadlan wac 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. U sheeg xiriiriyuhu inuu kuu waco lambarka dooneysid inaad wacdo, waxayna khadka soo gelin doonaan turjubaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Magaca Maamulaha

Name of Principal

Lambarka taleefanka Maamulaha

Principal's phone number